

# Baar Eedeymaha

Haddii aad aaminsantahay in xuquuqahaaga NLRA lagu xadgudbay, waxaad dacwad ka gudbin kartaa shaqo bixiye mise urur shaqaale. Waxaad foomka dacwadda ka heli kartaa [halkan](#). Fadlan la xiriir sarkaalka macluumaadka jooga [Xafiiska Gobolka](#) kuugu dhow si lagu caawiyo.

NLRB waxay sannadkii ka heshaa 20,000 ilaa 30,000 oo eedeymo shaqaale, ururro iyo shaqo bixiyeyaal oo ku hareysan dhaqamo shaqo oo aan cadaalad ahayn oo lagu sifeeyay [Farqadda 8 ee Sharciga](#).

Eedeymo kasta waxaa baaraya wakiilada guddiga kuwaasoo uruuriya cadeymaha lagana yaabo in ay dhaartaan dhinacyada iyo markhaatiyada. Natijjooyinkooda waxaa qiimeeya Agaasimaha Gobolka, xaaladaha warbixin mise kiisaska gaarka ahna, oo ay dibu eegeen qareennada NLRB ee Qeybta Talobixinta ee Washington DC. Sida caadiga ah, go'aanka waxaa lagu gaaraa cufka eedeynta 7 ilaa 14 toddobaad gudahood, in kastoo kiisaska qaarkood ay qaadan karaan waqti dheer. Inta lagu jiro muddadan, badanaa eedeymaha waxaa xalliya dhinacyada, waxaa ka noqda dhinacyada dacwoodaha, mise waxaa laalla Agaasimaha Gobolka. [Guji halka si aad u aragto jaantusyada iyo xogta](#).

Marka baaritaanka NLRB ay hesho cadeymo ku filan oo xoojinaya eedeynta, waxaa la sameeyaa dadaal kasta si loo fududeeyo heshiis dhexmara dhinacyada. Haddii aan xal laga gaarin kiis mudnaan leh, wakaaladu waxay soo saartaa cabasho. Eedeymaha caanka ah ee shaqo bixiyaha ee cabashooyinka waxaa kamid ah hanjabaad, weydiimo iyo ficillo anshax darro oo ka dhan ah shaqaalaha shaqada ururka; ballanqaadyada dheefaha si loo niyad jabiyo midowga; iyo, marka la eego xiriirka gorgortanka wadajirka ah, diidmada bixinta macluumaadka, diidmada gorgortanka, iyo ka noqoshada aqoonsiga. Eedeymaha caadiga ee ka dhanka ah ururada waxaa kamid ah ku fashilanka inay matasho shaqaale iyo inay ku fashilmaan anay daacad ah u gorgortamaan.

Soo saaridda cabashada waxay horseedaysaa dhegaysi kahor garsooraha Sharciga Maamulka ee NLRB (xal inuu jiro mooyaane). Kadib marka ay soo saarto cabashada, NLRB waxa ay noqotaa wakiilka dhinaca wax eedeynaya inta lagu jiro wadahadalada dajinta iyo habka guddiga. Qareennada guddiga ayaa gacan ka geysta ururinta iyo diyaarinta agabyada, oo ay dhinacyadu ka war hayaan horumarka kiiska.

Waa sharci darro in shaqo bixiye mise urur shaqaale uu kaga aargoosto shaqaalaha dacwadda ay xareeyeen mise kaqaybgalka baaritaannada mise dacwadaha NLRB.

## Xalalka

Sida uu dhigayo xeerkeeda, NLRB ma qiimayn karto ciqaabaha. Wakaaladu waxaa suurtagal ah inay soo celiso xalalka, sida dibu soo celinta iyo mushaharka shaqaalaha la fasaxay iyo xalalka macluumaadka, sida ku dhajinta ogeysiiska shaqo bixiyaha ee ballan qaadaya inaysan ku xadgudbin sharciga.

## **Amarro Kumeelgaar ah**

Inta kiisku ay wadaan Guddiga, Agaasimaha Gobolku wuxuu ka codsan karaa Maxkamadda Digmadda Maraykan ah ee ku habboon amarrada ku meelgaarka ah si loo soo celiyo xaaladdii hore ee lagu xadgudbay xuquuqaha, sida hoos yimaada Farqadda 10(j) ee Sharciga. Qareenka Guud waa inuu marka hore ansixiyo codsiga guddiguna waa inuu ogolaadaa. Haddii ay maxkamaddu ogolaato, amarka waxaa suurtagal ah, waxyaabo kale, inuu u baahdo dhinac inuu ku soo laabto gorgortanka, mise soo celiyo shaqaalihii sida sharci darrada loo ceyriyay, mise uu joojiyo qandaraas hoosaadka sharci darrada ah ee shaqooyinka ururka. [Riix halkan si aad u aragto liiska 10\(j\) ee hawlaha amar](#), iyo [halkan ka eeg arag khariidadda 10\(j\) waxqabadka](#).

## **Xafiiska Racfaanka**

Go'aamada lagu tuurayo eedeymaha waxaa suurtagal ah in rafcaan laga qaato Xafiiska Racfaanka Washington D.C. laba toddobaad gudahooda ee cayrinta. Xafiiska waxa uu qabtaa ilaa 2000 oo kiis sannadkii. Racfaan walba waxaa loo xilsaaray qareen iyo kormeere si dibu eegis loogu sameeyo dhammaan dukumeentiyada kiiska, oo ay ku jiraan macluumaadka cusub ee uu soo gudbiyay kooxda dacwoonaysa. Dhammaan kiisaska lasoo jeediyay in lagu baddelo go'aanka Agaasimaha Gobolka waxaa la horgeynayaa Xeer ilaaliyaha Guud si uu go'aan uga gaaro.

Kiisaska muhiimka ah ayaa suurtagal ah in loo soo bandhigo in dibu eegis uu ku sameeyo La taliyaha Guud xitaa halka ay tallada tahay in la taageero go'aanka Gobolka. Waxaa kale oo suurtagal ah in xafiisku uu dib ugu celiya kiisaska gobollada si loo baaro haddii loo baahdo. Sababtoo ah go'aamadan oo kale maaha kuwo dibu eegis lagu samayn karo maxkamadda dhexdeeda, ma jirto wadiiqo kale oo loo maro dhinacyada aaminsan in dacwadda si aan caddaalad ahayn loo tuuray.

**Faahfaahin dheeraad ah** mise si aad u heshid caawimo kusaabsan xereynta dacwad, fadlan kala xiriir sarkaalka macluumaadka [Xafiiska Gobolka NLRB ee kuugu dhow](#).